

# Qaado talaalka

## HEL \$50—QAADO TALAALKA COVID-19

Talaalka ayaa ah qaabka ugu wanaagsan ee lagu joojin karo faafitaanka COVID-19. Waataas sababta aanu u siinayno \$50 oo kaadhka hadiyada shirkad wayn oo tafaariiqda oonleenka gada dadka sida buuxda isku talaalay inta u dhaxaysa Sebteember 25, 2021 iyo Diseember 31, 2021.

Talaalka COVID-19 waa amaan, waxtar ayuu leeyahay oo waa bilaash. Xataa hadii aad hore u qaatay COVID-19, waa inaad weli is talaashaa. Macluumaad dheeraad ah si aad uga ogaato talaalka, booqo [coronavirus.utah.gov](https://coronavirus.utah.gov).

Inta badan xaaladaha, ma jirto wax lagaa doonaayo inaad samayso kadib markaad talaalka buuxa qaadato si aad u hesho kaarkaaga hadiyada. Kaarka hadiyada ayaa si ootomaatig ah loogu dirayaa boostadaada markaad hesho sheegashadaada ama waxaa noosoo sheegaaya State Vaccine Databases (Kaydadka Xogta Talaalka Gobalka).

### **Qofkee ayay tahay inuu qaato talaalka COVID-19?**

Qof kasta oo jira 12 sano iyo ka wayn.

### **Xagee ayaan ka helayaa talaalka COVID-19?**

Macluumaad dheeraad ah si aad uga ogaato talaalka, booqo [coronavirus.utah.gov](https://coronavirus.utah.gov).

### **Qofkee u qalma inuu helo kaarka hadiyada?**

Si aad ugu qalanto kaadhka hadiyada \$50 ah, waa inaad:

- Waa qasab inaad hadda ka diiwaan gashan tahay University of Utah Health Plans (Caymisyada Caafimaadka ee Jaamacada Utah) ama caymisyada Gaarka ah ee Suuqa, Healthy U Medicaid, ama mid kamid ah maadooyinkeena sida buuxda u leh caymiska si aad ugu qalanto helitaanka kaarka hadiyada. Haddii aad ka diiwaan gashan tahay Caymiska University of Utah Health, uma qalantid inaad hesho kaalmadaan.
- Tahay 12 jir ama ka wayn tahay
- Aad wada qaadatay talaalka inta u dhaxaysa Sebteember 25, 2021 iyo Diseember 31, 2021

- Talaallada Pfizer-BioTech iyo Moderna ayaa u baahan labo kuuro si aad u hesho talaal buuxa.
- Talaalka Johnson & Johnson ayaa u baahan hal kuuro si aad u hesho talaal buuxa.

### **Kuurada xoojinta ah ma u qalantaa kaalmada?**

Maya, kuurada xoojinta ah uma qalanto abaal marintaan.

### **Ka waran haddii aan qabay talaal buuxa kahor Sibteembar 25, 2021?**

Uma qalantid inaad hesho abaal marinta faya dhawrka.

### **Kaarka hadiyada nooc ee ah ayaan helayaa?**

Kaarka hadiyada oo \$50 ah oo ay leedahay shirkad oonleen ah oo tafaariiqda iibisa.

### **Sidee ayaan ku helayaa kaarkayga hadiyada?**

Marka caymiska University of Utah helo sheegashada talaalka Covid ama ogaysiis ka yimid Kaydadka Xogta Talaalka ee Gobalka, waxaan kaarka hadiyada \$50 dolar ah kuuguso diraynaa Boostada Waraaqda Heerka Koobaad ee USPS. Waraaqda ayaa lagusoo diri doonaa boqshad ka timid Caymiska Caafimaadka ee University of Utah, marka xaqiiji inaad iska fiiriso boosto kasta oon kuusoo dirno.

### **Ka waran haddii aan lumiyo kaarkayga hadiyada ama kaarkayga hadiyada uu ku lumo boostada?**

University of Utah ma badali karto kaararka lumay ama la xaday.

Caymisyada Caafimaadka University of Utah ayaa kaarka hadiyada kuugusoo diraaya ciwaanka aan kaa hayno. Ma badali karno kaararka hadiyada ee aan u dirnay ciwaanka khaldan ama ku lumay boostada. Haddii aad dhawaan guurtay, fadlan nalasoo xariir si aan u xaqiijino inaan hayno ciwaankaagii ugu danbeeyay.

### **Meeqa kaararka hadiyada ah ayaan u qalmaa?**

Qof kasta oo u qalma ayaa heli doona hal kaar oo hadiyad ah.

### **Maxaa kale oo ay tahay inaan ka ogaado abaal marintaan?**

Tani waa abaal marin halmar ah oo ay bixinayaan Caymisyada Caafimaadka ee University of Utah. Abaal marintaan waxaa bixinaaya Caymisyada Caafimaadka ee University of

Utah wax xariir ahna lama lahan Isbitaallada iyo Xarumaha Caafimaadka ee University of Utah ama Dhakhaatiirta University of Utah.

**Ka waran haddii aan qabo su'aalo dheeraad ah?**

Waxaad iimeel noogusoo diri kartaa [uuhp@hsc.utah.edu](mailto:uuhp@hsc.utah.edu).